Warbixinta Gobolka Saraar Ee Kormeerka Xildhibaanada

16.01.2012

Submitted by_____

Table of Contents

Hordhac 3

1. XAALADA AMNI EE GOBOLKA SARAAR KA JIRTA..... 4

2. XAALADA CAAFIMAAD EE GOBOLKA SARAAR 5

3. XAALADA GARSOOR EE KA JIRTA GOBOLKAN 6

4. XAALADA WAXBARASHO EE GOBOLKA SARAAR 6

5. XAALADA BIYAHA EE GOBOLKA SARAAR..... 6

6. WASAARADA BEERAHA 7

7. WASAARADA DIINTA IYO AWQAAFTA 7

8. MUSHAAKILKA DHULKA……..........7

9. MIISAANIYADA…..........8

10. WAXYAABAHA DADWEYNUHU QABSADEEN.....8

11. SOO JEEDIN……8

Hordhac

Waxaa 17—27--01-2012 ay kormeer balaadhan kusoo mareen deegaamada Gobolka Saraar ilaa degaamo ka mid ah gobolka Sool, iyadoo ay socdaalkaa ujeedadiisu ahayd u kuur-galka xaaladaha ay dadka degaamadaasi ku sugan yihihiin, sida: adeegyada bulshada, xaaladaha nololeed, iyo amniga guud ee degaamadaa .

Hadaba xildhibaanadu, iyaga oo gudanaaya waajibaadkoodii shaqo waxay kormeer balaadhan kusoo galaa bixiyeen goobaha muhiimka ah ee xarunta gobolka Saraar goobahaas oo ay kamid ahaayeen , Isbitaalada, Schoolada, Maxkamada, Saldhigyada iyo dhulkale oo muhiim ah, waxaana xildhibaanada aay goobkasta oo ay booqdaan waraysi kala yeelanayeen cidii ay khusayso, iyaga oo u kuur gelaayey xaalada dhabta ah ee goobtaas ka jirta , hadaba halkan waxaan idiinkusoo gudbinaynaa soo koobida nuxurka waxyaabihii aanu kala kulanay kormeerkaas balaadhan ,waxaana war bixintani iyada oo taabanaysa qaybo badan oo baahida halkaa ka jirta ay u diyaarsantahay xaalad xaalad ama waax waax .

1. XAALADA AMNI EE GOBOLKA

IYO DURUUFAHA HAY'ADAHA AMNIGA EE SARAAR KA JIRTA

Iyada oo aay baaxada dhul ahaaneed uu ku fadhiyo gobolka Saraari ay dhantahay sidatan marka xudun ahaan ama (Center) looga dhigo magaalo madaxda gobolka Saraar ee Caynabo:-

1. koonfur 68Km
2. Waqooyi 180Km
3. Bari 58Km
4. Galbeed 50Km

Waxaa xusid mudan inuu gobolkani xuduud balaadhan la leeyahay gobolka Sool,Buuhoodle iyo dhulbadan oo amnigoodu jilicsanyahay taas oo ay mar walba ay ka jiraan xaalad amni, waxaa gobolkan haysata mushaakil dhul jiifnimo oo ka dhaca niciisa bari taas oo aan loo hayn ciidan ku filan oo wax ka qabto,
Iyada oo xaaladu ay sidaa tahay waxaa deegaankan ka hawl-gala in kayar 50 booliis ah,waxaanay ku hawlgalaan waxaan gaadhin 10 Littre oo shidaal ah oo uga yimaada taliska ciidanka, waxaa ciidankan haysta dar xumo baladhan oo ay kamid yihiin:-

1. Gaadiid la'aan
2. Dirays la'aan
3. Daawo la'aan iyo
4. Saldhi la'aan

Iyada oo saldhigyadu ka mid yihiin haykalka dawladnimo iyo dhamaystirkeeda waxyaabaha tiirarka u ah, waxaa xusid mudan in aan gobolkaa intaa leegi aanu lahayn saldhig lagu ilaaliyo maxaabiista loosoo qa-qabtay denbiyada kala duwan ee ka dhaca guud ahaan deegaankan iyada oo ciidankan tirada yare e ku sugan gobolkan ay dhibaato ka kahaysato sidii ay u ilaalin lahaayeen maxaabiistaas, waxaa dhibaato xaga amniga ahi gobolkan ka haysataa dhinaca dhulka iyada oo maalinkasta ay wax yeelo ka dhacdo deegaamo kamida gobolkan kuwaas oo ka dhashay muran dhuleed,
Bilayska gobolku waa tiro ka yar 70 askari, taasina aad bay ugu yar tahay, rubuceed-n kuma filna..

Gobolku hal saldhig boolis buu leeyahay, kaas oo ku yaal magaala-madaxda Caynaba, nasiib darro kaasina waa dunsanaa labaatankii sannadood ee u dambeeyey, ilaa hadana waa dunsan yahay, waxayna degaamada gobolku u baaahan yihiin ilaa laba-saddex saldhig bilays ugu yaraan.

5. XAALADA CAAFIMAAD EE GOBOLKA SARAAR

Iyada oo caafimaafku uu yahay halbawlaha nolosha ee bili'aadamka waxaa Gobolka Saraar haysata mushkilad caafimaad taas oo ka dhalatay tirade isbitaalada ee gobolka ka jiro aad u yar ama aan jirinba marka laga reebo hal isbitaal oo ku yaala magaalo madaxda Gobolka Saraar ee caynabo, kaas oo aanay u dhamayn waxyaabihii uu lahaa Isbitaal sida daawooyinkii oo haba yaraatee aanay Wasaarada Caafimaadku waxay gaadhsiisaaba aanu jirin, waxaa dhisme deyr ah uu ku socdaa Spitalkan kaas oo ay dadweynaha qurbaha degan ee gobolkan u dhashay ay ku xidhayaan, waxaa kale oo xusid mudan in aanay Wasaarada caafimaadka ee JSL aanay warba ka hayn in uu isbitaal kajiro magaalada caynabo waxaana kamida baahiyaha haysta isbitaalkan

1. Dawo la'aan
2. Gaadiid la'aan (less transportation)
3. Dhismaha oo aad u yar (less wards)

Taasina waxaa wer wer aad u balaadhan ka muujinaaya dadweynaha deegaankaas ku dhaqan waxaa kale oo uu isbitaalkani aad ugu muhiim yahay difaaca guud ee dalka iyada oo caynabi tahay meesha ugu dhow ee lagu daaweyn karo ciidamada jiida hore kusoo wax yeelooba.

4. XAALADA GARSOOR EE KA JIRTA GOBOLKAN

Kadib markaanu waraysiyo la yeelanay masuuliyiinta heer gobol iyo mid degmo, waxaa warbixintaa noogasoo baxday baahi Garsoor oo aad u balaadhan oo haysata gobolkan, waxaa gobolkan ka hawl gala hal kaaliye iyo hal garsoore kaas oo aan gaadhsiisneyn garsoore heer gobol ah, taasina waxay abuurtay in aanu garsoorahaasi awood u lahayn inuu qaado kiisaska waaweyn taas oo sababtay inay intaas oo maxbuus oo u xidhan kiisas cul-culus ay ku mudo dhaafaan Saldhiga iyada oo aan la horkeenin maxkamad, waxaa jirta in la magacaabay Garsoorayaal cusub oo loo magaacay gobolka Sool kuwaas oo hada ku sugan gudaha laas caanood maadaama uu gobolkani markii hore ka tirsanaa gobolka Sool waxaa sida ay noo sheegeen masuuliyiinta gobolka Saraari dhacda hadii lays yidhaahdo u gudbiya nimankaas garsoorayaasha ah kiisaska u baahan awood gobol ee deegaankan ka dhaca aanay suuroobayn maadaama nimankaas aanay ahayn rag shaqaynaaya oo keliya ku jira Hotel Xamdi ee magaalada Laascaanod, waxaa gobolkan haysata baahi dhisme maxkamadeed iayda oo hal qol oo aan lahayn imkaaniyaadkii looga baahnaa ay maxkamadu ka koobantahay garsooruhuna uu xafiis yar ku leeyahay xarunta dawlada hoose.

5. XAALADA WAXBARASHO EE GOBOLKA SARAAR

Iyada oo waxbarashadu tahay ta ay bulsho ama ku haruumarto ama ku dib dhacdo, ayaa waxaa gobolkan kuyaala laba l dugsi sare oo ah GUUTAALE SOCANDARY SCHOOL iyo dugsi sare oo ku yaal degmada Oog . waxaa kale oo laga helayaa Schools gaar loo leeyahay oo ku yaala magaalo madaxdiisa kuwaas oo aan buuxin Karin baahida wax barasho ee gobolkan ka jirta, guud ahaan Schoolada gobolkani ku yaalaa mahaystaan macalimiin ku filan,iyada oo uu gobolkani aad uga hooseeyo gobolada kale dhinaca waxbarashada taas oo ay ugu wacantahay Wasaarada Waxbarashada JSL oo aan xil iska saarin haruumarinta waxbarasho ee gobolkan waxaana jira degaamo ay weli ardaydu Waabo ku dhigtaan, daasadana ku fadhiyaan.

6. XAALADA BIYAHA EE GOBOLKA SARAAR

Gobolkan waxaa haysata xaalad biyo macaan la’aan iyada oo aanay jirin wax biyo macaan ahi marka laga reebo baraago roobaad iyagu markiiba iska go’aaya biyihiisa dabiiciga ahna waa qadhaadh iyada oo ay Caynabo tahay meelaha ugu biyaha badan Somaliland laakiin nasiib daro aanay biyahaasi ahayn ku bili’aadam ku noolaankaro, baahiyaha biayaha la xidhiidha ee gobolkan ka jira waxaa kamida;-

1. iyada oo aanay jirin xaruntii W/macdanta iyo Biyaha iyo meel lagu shaqeeyaa toona
2. Majiraan wax Kharashaad ah oo ay Wasaaradu u qoodaysay dhinaca biyaha ee gobolkan

3. Majiraan wax shaqaale ah oo ka hawl galaa marka laga reebo isu duwaha
4. Majiraan wax gaadiid ah oo Wasaarada ka jooga gobolkani
5. Majiraan biyo macaan oo dadka gobolku haystaan, marka laga reebo baraagaha oo go'aya

6. Wasaaradda BEERAHA

Iyada oo gobolkani uu ku caanyahay dhaqashada xoolaha nool ayaa hadana waxaa jira beero ay dadku kala soo baxaan dalagyo kala duwan, hadaba baahiyaha dhinaca beeraha la xidhiidha ee ka jira waxaa kamid ah:-

1. Waxaa Wasaarada Beeraha ee gobolka Saraar ku magacaaban hal isu duwe mana jiraan waaxyihii kale ee muhiimka ahaa.
2. Majiraan wax xafiisyo ah oo wasaaradu leedahay
3. Majiraan wax kharashaad ah oo degmo ahaan ama gobol ahaan ay Wasaaradu ugu talo gashay

Wax soo saarka beeraha waxaa gobolku ka marayaa meel fiican iyada oo ay hore u jirtey in khudrada laga keeno galbeed iyo dhinaca Burco hada waxay reer Caynabo khudrada u diraan Burco, xaga cuntada waxaa kasoo go'ay Hadhuudh,Digir,Si'sin,Xabxab.Galay iyo Bariis.

Waxay hay'ada DRC ay beeraleyda gobolka u qaybisay qalab iyo mishiino iyo tababaro ay u qabatay qaar kamida beeralayda gobolka.

4. Wasaaradda DIINTA IYO AWQAAFTA

Iyada diintu ay tahay shayga ugu horeeya ee hirgelinteeda uu xilkasaaranyahay dhamaan umada muslimiinta ah, ayaa waxaa baahi xaga Wasaarada Diinta iyo Awqaafta ahi ay ka jirtaa gobolka Saraar;-

1. Majirto wax xarun ah oo ay Wasaaraada Diinta iyo Awqaaftu ku leedahay gobolka Saraar
2. Malaha wax shaqaale ah marka laga reebo isuduwaha Wasaarada ee gobolka Saraar
3. Majiraan wax gaadiid ah W/D/Aw-qaafta uga hawl gala gobolkani
4. Majiraan wax kharasshaad ah oo ay Wasaaradu ku caawiso isuduwaha halkaa ugu sugan

5. Mashaakilka dhulka:

Dhibaatooyinka dhulku aad bay ugu badan yihiin degaamada gobolka, tusaale ahaan dhul-daaqsimeedkii oo dhan waa la ootay, sidoo kale magaalooyinka waxa ka jira muran dhul oo had iyo goor taagan, iyadoo ay dadku iskood isaga qaytaan dhulal banaan oo aanay sharci u haysan, waxayna mashaakilka dhulku keenaan iska hor-imaadyo sababa dhimasho, dhaawacyo iyo xasilooni daro.

6. MIISAANIYADA

Degmada Caynaba oo ah magaala-madaxda gobolka Saraar, waxa kab loo siiyaa 0.95%, degmooyinka kale ee gobolkana hadalkoodaba iska daa, intaas ayaa degmooyinka kalena sed u ah.

7. WAXYAABAHA DADWEYNUHU QABSADEEN

Dadweynaha ku dhaqan gobolka Saraar iyaga oo aan wax gacan ah ka helayn dhicna dawlad iyo cidkale toona waxay dib udhis balaadhan ku sameeyeen gobolkoodii, waxaana hada mashariicda ay qaarna dhameeyeen qaarna gacanta ku hayaan kamida , Jeelka weyn ee caynabo oo u dhamaaday kaas oo ay dhismihiisa iska kaashaadeen dadweynaha reer Caynabo, waxaa kale oo ay gacanta ku hayaan xaruntii gobolka Saraar taas oo gebo-gebo ku dhow, waxaa kale oo dadweynahani deyr wweyn ay ku wareejiyeen xaruntii isbitaalka ee magaalada caynabo kaas oo inbadan ay xooluhu iska gelayeen, hadaba iyada oo uu dadku sidaa u dadaalayo waxaa meesha ka maqan kaalintii ay dawladu ku lahayd dib udhiska dalka.

8. SOO JEEDIN

As the representatives of Sool region we are strongly recommended to the public sector and international organizations to make well immediately the concerns of our constituency.

Presented by: